# Halgankii Ummada
# Iyo
# Hamigii Xasan Yoonis Habane

April 6,2010
Mareegta Farshaxan

"Mujaahid Xasan Yoonis hadduu geeriyooday taariikhdiisii may dhiman, qofkuna inta uu nool yahay hadduu taariikh ka tago muu dhiman, waxaase nolosha ku dhintay kuwa aan taariikhda waxba ku lahayn".

Muj. Maxamed Xasan C/laahi (Jidhif)

Wixii dhacay shar iyo kheyr
Intaan shaahid u ahaa

Shamsadan aan joogna iyo
Haddaan shalay kuugu simo

Ma jiro shay noo qornaa
Sheekadu inay tahay sidaa

Jibuhu nimankuu la tegey
Wadnaha shaandhada ka dhigay

Shanshada dhuuxleh iyo
Lafihii qaarkood shuxaan

Kuwaa shilixyada ka jaban
Haddaan shidhidi layn

Shihiid maaha la yidhi
Shisheeyana nagama dilin

Shil helayna maa naan ogeyn
Wanaagii shaarubaha

Shil madow baa loogu xidhay
Siyaasadka shoodhadka ah

Shirqool bay nagu hayaan
Shibiro laayey sitaan

Waxbay shaadh-gaamiyaan

Shiinley, Xasan X. C/llaahi (Xasan-Ganey)

# Hordhac:

April 6,2010
Mareegta Farshaxan

Xilli ku beegnayd bishii Noofambar 27$^{dii}$, 2006 $^{dii}$ waxaa geeri dhabarjab keentay ku habsatey mid ka mid ah halyeyadii lagu ladey ee dhidibada u taagey jiritaanka wadanka Somaliland oo xornimadiisa ka qaatey gumaysigii Ingiriiska bishii Juun 26 $^{dii}$, 1960 $^{kii}$. Hase yeeshee qiiro Soomaliweyn ah darteed ayaa loo boqno gooyey guushaa la hantiyey. Waxaa labadaa dal ee Somaliya iyo Somaliland oo iskudarsadey si ay kulanka shanta Soomaaliyeed ugu noqdaan gun-dhig soo maray xukuumaddo lagu hungoobey. Riyadaasi shanta ahi waxay beenowday markii Xamar layskugu tagey aaney bilaabmantay in mar labaad dib loo qotomiyo dhidibadii wadanka Somaliland. Waxaana halgankaa danbe ee dhidibada u taagey wadanka Somaliland ku guulaystay dhaqdhaqaaqii wadaniga Soomaaliyeed (SNM) oo bishii May 18 $^{dii}$,1991$^{kii}$ taagey calankii lafdhabarta laga dhantaaley.

Waxaa mujaahid Xasan Yoonis loo tiriyaa inuu u dhintay beer-xanuun. Gu'gu markuu ahaa 1982 $^{kii}$ ayaa loo tiriyaa xanuunkaa beerka inuu u tagey dhakhtar ku yaala wadanka Talyaaniga,safarkaa wuxuuna sii maray wadanka Sucudiga.Sidoo kale markii dawadii u dhamaateyna wuxuu mar labaad haddana soo maray wadanka Sucuudiga oo Dhaqdhaqaaqii Wadaniga SNM aad ugu xooganaa.Waxaana u suurtogashey inuu la kulmo hal doorkii joogay magaalada Jiddah layskuna xog waran, inkastoo aad layskugu dhuundaloolay markii horeba.

Mujaahid Xasan Yoonis socdaalkaa wuxuu kaloo ku soo maray magaalada Jabuuti oo ay qaabileen shaqaalihii safaarada Somaliya halkaa u joogay.Waxaanay gacanta ka galiyeen tigidhkii diyaarada ee Jabuuti ilaa Muqdisho. Dhinaca kale wuxuu si hagoogan ula kulmay odayaashii halganka talo iyo dhaqaaleba ku taageerayey ee deganaa wadankaa Jabuuti uuna wargaliyey in gacanta loo soo galiyey tigidhkii uu Muqdisho ku tagi lahaa. Xubnihii Shirku kumuu farxin warkan, in badana waa laga dooday wuxuuse mujaahidku u sheegay inuu tagayo Xamar yahayna sarkaal ka tirsan ciidanka Soomaaliya.Waxaase mujaahidka oo aad loogu yaqaano deganaansho, af gaabni iyo geesinimo u guntaneyd arin fulinteeda uu hoosta ka wadey. Shirkaa odayaashii iyo waayeelkii kumay rayrayn siduu ku dhamaadey,guul weyn baaney tirsanayeen kooxdii ka socotay safaarada Soomaaliya markuu ka aqbalay qaadashada tigidhka gaynaya Xamar. Waxaa markaa Mujaahid Xasan Yoonis geeyey garoonka diyaaradaha Cabdi Cabdilaahi oo iminka ku sugan magaalada Toronto ee cariga wadanka Kanada, markii aanu waydiinay inuu nooga waramo maalintaa iyo siday wax u dhaceena wuxuu yidhi: "Runtii kulankaa oo aad loogu hanweynaa kumuu dhamaan sidii la filayey, Mujaahid Xasan-na ku adkeysay inuu Xamar ku noqonayo, lagamase niyadjabin waayo wuxuu ahaa nin uu halgankaasi aad ugu baahnaa, markaa waxaan dhigay goroonkii diyaaradaha ee Jabuuti waanan ku soo noqday magaaladii".

Muddo ku dhaw dhawr saacadood ka dib ayaa telefoon u soo dhacey odayaashii kuna keenay lama filaan. Waxaase aad uga sii yaabiyey oo amakaagna ku beeray faahfaahinta warka oo xanbaarsaneyd mar guul, marna dhan loo qaadaba la garan la'aa.

# Ababkii Mujaahid Xasan Yoonis Habane:



Yoonis Habane wuxuu deganaa dalka Jabuuti muddo dheer.Wuxuu Yoonis Habane ka mid ahaa odayaashii aadka looga dambayn jiray, halka dadka qaarkii ku tilmaameen in milgihii suldaaneed loo haneeyey xilligaa. Waxaa had iyo jeer loola tagi jiray talo iyo tusaale inuu ka bixiyo dhacdooyinka saameynta ku lahaa bulshadii halkaa joogtay. Gu'gii 1950 kii ayaa Yoonis Habane iyo Caasha Ismaaciil Madar uu wiil ugu dhashey ayna ugu wanqaleen inuu ku hanaqaado magaca Xasan. Waxaa kaloo la dhashey wiilkaa caruurta ay ka mid yihiin Maryan, Cali, Axmed, Faadumo, Aamina,Cabdiraxmaan iyo Khadra.

Ilma Yoonis Habane waxay ku kacaameen magaalada Jabuuti,hase yeeshee waxay u soo digorogteen magaalada Hargeysa.Markaa ay yimaadeen magalaada Hargeysa Xasan Yoonis Habane wuxuu ka mid noqday ardeydii dhigan jirtay madarasada Sh.Baraawe.

Xasan Yoonis Habane wuxuu ku barbaarey magaalo madaxda dalka Somaliland ee Hargeysa. Wuxuu dugsigii dhexe iyo kii hooseba ka galay dugsiga Biyo Dhacey. Aqoonyahanka Faysal Cumar Mushteeg oo luuqda codkiisana ay dhagaheenu ka dheregsan yihiin ayaa ka mid ahaa macalimiintii dugsiga Biyo Dhacay,abti ahaana ugu toosnaa Xasan Yoonis ayaa wareysi lala yeeshay yidhina: " Waxaan macalin ka ahaa dugsigaa Biyo Dhacey Intermediate,waxaana ardeydaydii ka mid ahaa Xasan Yoonis Habane,………..".

Waxaa Xasan Yoonis lahaa nabar raad kaga reebay wajiga,Faysal Cumar Mushteeg oo ka waramaya siduu ku dhacay nabarkaasi wuxuu yidhi: " Waxaa jirtay maalin ay ciyaalku dabaal u tageen balay ku yaalay halka la yidhaa Jaamac Gunti,markaana waraabe ka qaniinay halkaa canka oon dhakhtarka geeyey waana la tolay".
Xasan Yoonis wuxuu dhameystay kana baxey dugsigaa hoose/dhexe ee Biyo Dhacey gu'gii 1968kii , waxaana wareysi aanu la yeelaney Aadan Hanfi oo iminka degan cariga Kanada sheegayna inay isku xilli ka baxeen dugsiyada hoose/dhexe ayna aheyd 1968 kii, inkastoo uu Aadan Hanfi ka soo baxey dugsiga hoose/dhexe ee Gabiley.

Xidhiidh aanu la samaynay Caydiid Axmed Qaalib oo iminka degan magaalada Ottawa ee cariga Kanada ayaa sheegay in xilligaasi ay aad u yaraayeen dugsiyada sare, ardeydiina loo qaybiyey laba qaybood kuwii keenay darajooyinka A iyo B, iyo kuwii keenay darajooyinka C iyo D. Waxaa markaa 1968ki ay aheyd xilligii ugu danbeysay ee dugsiyada lagaga baxo todoba sanno waxaan loo ogolaadey kuwii A iyo B inay dugsiyada sare galaan,halka kuwii kale laga dhigay fasalka sideedaad ee dugsiyada dhexe. Xasan Yoonis sidaasuu kaga mid noqday ardeydii gashey dugsiyada sare gu'gaa 1968kii .

Mujaahid Xasan Yoonis markaa wuxuu u baqoolay magaalada Burco, kana mid noqday ardeydii dugsigii sare ee Farsamada gacanta. Dugsigani wuxuu ahaa muddo saddex gu' ah . Ardeydii ay halkaa ku kulmeen waxaa ka mid ahaa Mujaahid Maxamed Kaahin oo sheegay in ay Xasan Yoonis soo wada noolaayeen ilaa 1968kii, isla markaana ay arday ka wada ahaayeen dugsigii Farsamda Gacanta ee Burco.

Mujaahid Xasan Yoonis Habane wuxuu dhameystay dugsigaa Farsamada Gacanta gu'gii 1971kii, uuna u socdaalay magaalada Xamar. Xilligan waxay halkaa ay ku kulmeen Aadan Hanfi oo sheegay inuu Xasan u fadhiistay imtixaan loo galayey laylis sarkaal. Bilawgii 1972kii ayaa Xasan Yoonis loo geeyey tababarkii bilawga layska sarkaalnimo duleedka magaalada Kismaayo si uu u sii barto afka Ruushka. Waxaa xilligaa halkaa ku ugu sugnaa tababar saraakiil uu ka mid ahaa mujaahid Maxamuud Xirsi Xasan oo isagu markii danbe ka mid noqday ciidamada badda, kuna geeriyooday halgankii xaq u dirirka ee SNM.

Waxaa Mujaahid Xasan Yoonis loo diray dalka Ruushka siiba jaamicadii "odays" gu'gii 1973 kii.Mujaahid Maxamed Xasan Jidhif oo arintaa ka hadlayana wuxuu yidhi : "Xasan Yoonis saddex sanaaadood ayuu naga dabeeyey waxaanu galay kuliyada ciidamada ee Odessa ku taala gu'gii 1973 kii. Wuxuu Xasan Yoonis Habane soo bartey ciidamada dhulka.Wuxuuna qaatey xidig markaa uu soo noqday, hawlgalkiisa shaqana wuxuu u badnaa gobolada dhexe".

Xilligaa ardeyda ama shaqaalaha la qaadaa waxay tagi jireen meelahan ka mid ahaa wadanka Ruushka,iyadoo loo eegayo waxa la soo baranayo:
Ciidamada Cirku : Magaalada Tashkant
Ciidamada Dhulkuna : Magaalada Odessa ee gobolka Ukrain.
Ciidamada Baddu : Magaalada Baku ee gobolka Azerbijaan.
Siyaasiiyiinta iyo kacaameynta : Magaalooyinka Lavov iyo Mosko.
Dhinaca Dhakaatiirtana: Leningaraad

Wuxuu Mujaahid Xasan Yoonis ku soo laabtey dalka gu'gii 1975 kii, kana hawlgalay dugsiga shanaad ee magaalada Xamar ku yaalay. Billo ka dib waxaa lagu tolay xidigtii ugu horaysay,loona badaley xerada Buulabarde ee Xamar iyo Baladweyn u dhaxeysa. Xasan Yoonis oo ku sugan kana hawlgala xeradaa Buulabarde ayaa waxaa dhacey dagaalkii 1977kii. Mujaahid Xasan yoonis wuu ku dhaawacmay dagaalkani, waxaana aad loo xasuusan yahay inuu Xasan Yoonis ka soo noqday dagaalkaa isagoo ah saddex xidigle ama kabtan.

Markii uu dhamaadey dagaalkii 1977kii ayaa loo badaley Mujaahid Xasan Yoonis magaalada Garoowe uuna ka noqday taliye ku xigeen.Muddo gaaban ka dib ayaa Mujaahid Xasan Yoonis loo caleemo saarey inuu noqdo taliyaha ciidanka Gaalkacayo.Waxaa la xasuusan yahay in uu dhaawac miineed soo gaadhey Mujaahid Xasan Yoonis xilligii uu halkaa ku sugnaa, daaweyn ahaana loogu qaadey Xamar. Markii uu caafimaadey ayuu hawlgalkiisii ka sii wadey magaaladii Gaalkacayo.

Waxaa runtii ismaandhaaf badani ka yimaadaa in Xasan Yoonis uu dhibaato ka gaystay gobolada dhexe, hase yeeshee waxaa lagu tiriyaa go'aamadii dawladu la doonaysay goboladaa in laga fuliyo in badan inay suurtogali waayeen raga joogay markaa dartood oo uu ka mid ahaa Xasan Yoonis .

Halkaa wuxuu ku sugnaa muddo aan sidaa u sii dheerayn,waxaase loo badlay inuu ka hawlgalo abaanduulka ciidamada qaranka Soomaliyeed ee saldhiga Xamar.Wuxuu Xasan Yoonis ku sugnaa halkaana lix bilood.

Waxaa xilligan dhib badan ku hayey cudur saameyn weyn ku yeeshay beerkiisa oo keenay in 1982kii loo diro dalka Talyaaniga caafimaad ahaan. Xilligan waxaa hadalhayn badan ka jirtay ururkii SNM oo dhidibada loo aasay.Waxaa xidhiidh dahsooni ka dhexeeyey saraakiishii ku sugnayd dalka oo dhan. Mujaahid Cali Xuseen iyo Mujaahid Haybe Cumar ayaa si hagar la'aaneed ah u wadey xidhiidha siiba ka ka dhexeeyey saraakiisha joogtay Xamar. Taageerada dhaqaale iyo tayaba waxaa markaa SNM ka tirsaneysay xubnihii deganaa Carabaha siiba Sucuudiga. Mujaahid Xasan Yoonis isagoo ka dheregsan sida hawluhu u socdaan ayuu socdaalkan ku sii maray dalka Sucuudiga. Cabdikariin Xasan Caalin oo markaa ku sugnaa magaalada Jidda ayaa nala wadaagey odhaahdan: " Anigu markaa waxaan ku sugnaa halkaa Jidda aqoon fiicana umaan laheyd Xasan ee Walaalkii Axmed ayaanu wada deganeyn markaa runtii wuxuu ahaa safar loo bogay aadna arimo badan layskula meeldhigay, isaguna wuxuu aad nooga waramey maadaama uu joogay abaanduulka ciidamada wixii halkaa ka jiray xog badana waa la kala qaatey".

Waxaa kale oo markaa halkaa ku sugnaa Aadan Hanfi taageerayna imaatinkaa Mujaahid Xasan Yoonis.Waxaanu Aadan Hanfi sheegay inuu gu'gaa 1982kii uu yimid magaaladaa Jidda Xasan Yoonis Habane oo u socday dalkaa Talyaaniga,waxaanu Aadan yidhi: "Anigu safar baan ugu sii jeeday magaalada Muqdisho markaa oon soo cusboonaysiisanayey baasaaboor,waxaase aad u mudan in maalintaa Xasan yoonis la wargeliyey inuu Mujaahid Mahdi(IHUN) talaabey ".

## Xubinimadii Ururka SNM:

Samaan laguma doonee xornimo waa sange u fuule
Salax dakhar leh meyd soobiriyo seedo waran gooyo
Soofkoo la kala qaado iyo siigo kor u duusha
Haweenkoo gambada saydha iyo sebi agoomooba
Iyo libintu waxay saaran tahay suluf colaadeede
Gobannimo , X.Aadan Af-Qalooc .




Gu'gii 1982kii dabayaaqadiisii ayaa waayeelkii iyo odayaashii deganaa Jabuuti heleen telefoon. Waa mujaahid Xasan Yoonis Habane oo ka degay joogana magaalada Diridhaba lana wadaagey odayaashii inaanu u baahneyn falcelin ay safaarada Soomalidu samayso sidaana uu ku gaabsadey inuu ka hadlo qorshihiisa ku biirista SNM. Xilligan baa loo tiriyaa Mujaahid Xasan Yoonis inuu ku biiray ururkii SNM.

Waxaa markaa daahfurtay guushii ay shaqaalihii safaarada Soomalida ee Jabuuti la wadaageen Ina Siyaad ee aheyd inay gacanta ka galiyeen tigidhkii uu Mujaahid Xasan Yoonis ku iman lahaa magaalada Muqdisho,iyaguna ay diyaar u ahaayeen soo galbintiisa. Waxay taasi noqotay ciyi waa ka baryey ama saanbuuse laga eedaamey.Dareenkii markaa ka taagnaa magaaladaa

Muqdisho ayaan aheyn mid raynrayni ka muuqato, ku biirida Yoonis Habane uu ku biiray ururkii SNM-na ay ku keentay caloolyow iyo baqdin hor leh.Mujaahid Abiib Diiriye Nuur (Abiib Tima Cad) ayaa taabtey arintaa yidhina: “Waxaan xasuustaa Mujaahid Xasan sidii uu u ururiyey ciidammadii xoogga dalka ee ku soo biiray ururka SNM oo uu taliyahooda noqday, waxaanu ka mid ahaa saraakiishii faro-ku-tiriska ahayd ee ay ka naxday maamulkii Siyaad Barre markii ay ku soo biireen SNM. Waxaana igu maqaala ahayd waa laga mudaaharaaday Muqdisho xilligaa”.

Mujaahid Xasan Yoonis Habane sidaasuu uga mid noqday xubin sugan aadna loogu baahnaa,waxaase tilmaan mudan inaanu ku hakan magaalooyinka Addis Ababa iyo Diridhaba ee uu markiiba hawlgalay.

# Halyeynimadii Mujaahid Xasan Yoonis:

*Geesiga* Dhulkiisa Guusha U Horseeda
*Geerida Dishaay* Geedkaa Ha Ba"o

Gobanimada waa loo go'aa
Godka aakhiriyo,Iilkaa loo galaa
Ciida loo gala,
Goowracadana waligaa niyee
Geedkaa ha ba'o

Bishii April 6,1981[kii] ayaa aheyd goortii dhidibada loo taagey ururkii SNM.Tani waxay ku abuurtay hogaankii dawladii habaarqabto warwar weyn.Sidaa darteed wuxuu u hawlgalay inuu xidhiidh wanaagsan la yeesho wadamada Kenya iyo Itoobiya. Labada dalba wuxuu hogaankaa dawlada habaarqabto ku haystay inay haystaan dhul Soomaaliyeed. Hase yeeshee kulankii 1981[kii] uu Ina Siyaad kula kulmay madaxweynihii dalka Kenya ee xilligaa mudane Daniel Arap Moi magaalada Nayroobi wuxuu afweyne si cad u qiray inuu dib uga laabtey kaalmeyntii dadka Soomaaliyeed ee NFD,hase yeeshee uu rabo in Daniel Arap Moi uu ka qayb qaato heshiis ka dhex dhici kara Soomaaliya iyo Itoobiya ogol yahayna inuu sidoo kale ka hadho kaalmeynta dadka Soomaaliyeed ee degan Itoobiya (Kilina Shanaad-Reserve Area).

Horaantii 1982[kii] ayaa Daniel Arap Moi iyo Xasan Guuleed Abtidoon sameeyeen kulakoogii ugu horeeyey ee ka hadalka dhexdhexaadinta labadaa dal ee Soomaaliya iyo Itoobiya.Shirarkaasi oo socday muddo dheere ayaa horaantii gu’gii 1986[kii] labadii hogaan ee Ina Siyaad Iyo Mingiste ogolaadeen inay fool ka fool isku soo horfadhiistaan. Inkastoo aan heshiis la kala saxeexan aad baa layskugu soo dhawaadey Afweynena ogolaa inuu ka hadho dhulkaa “Reserve Area”, kol haddey Itoobiya ogoshahey kaalmo ka goynta ururada mucaaridka ee SNM iyo SSDF.

Horaantii bishii April ee 1988[kii] ayaa lagu qabtey kulankii labaad magaalada Jibuuti,qalinkana lagu duugay heshiiskii nabadeed iyo diplaamaasiyadeed ee labadaa dal. Dhinaca ururkii SNM ayaa xilligan ku jiray u diyaargarowga xuska sannad guuraddii aasaaska SNM. Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale”Boobe” oo ka waramayaa maalin ka mid

ah maalmihii ugu darneyd ayaa sheegay in iyagoo ku hawlaysan u diyaargarawga maalintaa, sameeyeyna kooxdii Maxamed Mooge la wargaliyey in la xidhay xafiiskii SNM ee ku yaalay magaalada Addis Ababa,idaacadiina albaabada loo xidhay.

Heshiiskaa laba geesoodka waxaa saameyn ku yeelatay ururkii SNM inta sugaysay in ciidamadii SNM laga soo raro jiidaha hore ee dagaalka ,islamarkaana uu ururka SNM dhidibada u jaro hawlgaladii milateri ee uu ku hayey dawladdii Siyaad Barre.Waxaa markaa ururkii SNM la soo gudboonaatey xaalad aad u adag oo la odhan karo waxey aheyd ""kala dooro laba daran". Xubnihii SNM waxaa la soo gudboonaatey ayna talo ku goosteen in aanay laba mid ka dhexeyn "Ama geeri Aakhiro ama guushii nololeed".Sidaa darteed ayaa ururka SNM go'aansaday wax lama filaan ah oo aad uga duwan wixii ay labada dawladood ku heshiiyeen, waxayna SNM talo ku gaadhay inay ciidamadeedu madax-madax isugu tuuraan gudaha, iyaga oo toosna u abaaraya saldhigyadii waaweynaa ee ciimadii qaybtii 26aad ee taliskii Ina Siyaad .

Maalintan ayaa raggii aad ugu adkaa in shawlada madax madax loo galo uu ka mid ahaa Mujaahid Xasan Yoonis oo aaminsanaa in geeridu dhaanto dhibta taala oo la dugsado. Maalintii gunimo iyo gobanimo la kala dooranayey , maalintii geediga in la gurigeeyo ama geeri go'an la dajiyo ay aheyd, maalintii heshiiska ay kala saxeedeen xukuumadii Soomaliya iyo xukuumadii Itoobiya ayaa saraakiisha SNM ka tashanayeen sidii la yeeli lahaa.

Kaalintii maalintaa ee mujaahid Xasan Yoonis Habane oo aheyd lama ilaawaan ayaa waxaa daaha ka rogay Mujaahid Maxamed Kaahin Axmed oo yidhi:"Wuxuu ka mid ahaa mujaahid Xasan raggii qayb libaax leh ka soo qaatay halgankii, waxaanan aad iyo aad u xasuustaa markii 1988-kii la soo galayey dalka ayaa waxa la xisaabiyey wax yar ee ay haysato SNM iyo waxa badan ee uu haysto taliskii dadka xasuuqayey, markaa Xasan oo ahaa abbaanduulahayagii ayaa saraakiishii oo ku shiraysa Dhoobo Guduud awaamiirtii uu bixinayey wuxuu ku qoray waxa laga soo hadlayaa xidhiidhka Raadiyaha, Raadiyowna maba lihin. Alle haw naxariistee Mujaahid Xuseen Kharash Yare ayaa yidhi Raadyowyadan Xasan sheegayo xaggee laga keenayaa?, kuwa aad Faqashta ka qabsanaysaan ayaa laga soo wada hadlayaa ayuu (Mujaahid Xasan Yoonis) ku yidhi. Markaa wuxuu ahaa nin casiimaddiisu ay gaadhsiinayso adigoo gacmo madhan ciidankaagu wuxuu guusha ku gaadhayaa cadawgaaga farsamada aad u dhigto wuxu ku qabsado ayuu ku soo hawlgalyaa,"

Xuska sanad-guurada 1-aad ee geeridii Muj. Xasan Yoonis November 29, 2007 Guddoomiyaha Xisbiga Mucaarid ah ee KULMIYE Axmed Maxamed Maxamuud [Siilaanyo] oo halkaasi ka hadlayey ayaa yidhi :"Waxa uu ahaa (mujaahid Xasan )geesi kaalin weyn ka soo qaatay halgankii ururka SNM ee dalka lagu xoreeyey, isla markaana waxa uu ahaa nin kaalin libaax ka soo qaatay hawlihii dib-u-dhiska iyo jiritaanka Somaliland, isaga oo ahaa taliyihii ciidamada qaranka, kana mid ahaa dadka horumarka dalka ka shaqeeya, isaga oo isku dayay inuu khayraadka macdanta dalka soo saaro, si uu horumarka bulshada uga qayb-qaato, sidaas darteed waxa uu noqonayaa Muj. Xasan Yoonis hormoodkii halganka Somaliland ,

Xildhibaan Axmed Maxamed Diiriye (Nacnac) oo isaguna munaasibadaas ka hadlay ayaa yidhi "Runtii Mujaahid Xasan Yoonis waxa uu ahaa nin wadaniya oo halgamaaya oo

dalkan iyo dadkanba abaal ku leh, illaahayna naxariistii janno ha ka waraabiyo".

heshiiskuu daraaday u galay daalinka Afweyne
shaxduu dagay midbaa loo dagaye mala-daraantiisa
doqonkii Ogaadeen ku waa dagaladiisiiye
Itoobiya dal uma haysaniyo saynka lagu duugay

inuu yahay dalaal buu u qiray duulankii shalaye
xabashigu dantiisuu arkaye tayda muu dayne
anigaba durkii laygu waday daabacay is rogaye
hadaydaan daf soo odhan habeen idinka oo duuban

si kaloon ku doona xornimo nama dawayseene
dab wixii onkaday iyo wixii danab is dhaafaayay
dushiinaanu so halabsanay iyo doonti Nabi Nuuxe
haday maalintii nala dagto on ruux Duriyad sheegan

duligaan ku noolayn marnaba kama daraateene
daaraha burburay ee madfaca lagu duqaynaayay
dahab iyo damaar iyo intii duunyo lagu waayay
intii diric shaheediyo intii danab ku naafowday

inta caydh u soo dibad baxdee een daxandaxoonaynin
dir-xunkaad dhamayseen ayaan kaga dawoobaaye
nimankii lahaa duub-casta iyo yayda daba joogta
nimankii daluumaha xabsiga iilka nagu diiqay

nimankii dibnaha eegayee  hadalka noo diiday
nimankii dubkoodi gubnaa aragu diidaayay
daymadooda nimankii indhaha dab iga leefaayay
halkaan dabada saaraba kuwii igu dul-meeraayay

magacyada dugaaga ah kuwii darajo moodaayay
dabar-goynti baan nahay kuwii marinka loo daayay
nimankii dadkay soo xidhaan kiish la daba qaado
madax-furasho lagu doonayee duunka ka colownay

nimankii dukaamada liqee rag uga duuduubtay
dagaagaan lahayn xeer gobeed ninaad u dayn raacdo
nimankii duqayn jiray  guryaha daakirkiyo laylka
dugay iyo caruur iyo kuwaan dumarka dhaafaynin

diricyada haweenkiyo kolay dahabka goostaanba
nimankii hablaha tay damcaan duhurka xoogaayay
duligaan lahayn dhaqanka iyo diin uu kaga waabto
maydkooda oo daadsan baan so dul-joogsadaye

## Baadisooca Tilmaameed:

Waxaa aad loogu tilmaamaa Mujaahid Xasan Yoonis Habane inuu ahaa nin ay askarinimadu u soocan tahay, had iyo jeer ka ilaaliya inuu ku ladho wax kale sida siyaasadaha aan jid haysan. Faysal Cumar Mushteeg oo ahaa macalinkiisii ayaa sheegay inuu Xasan Yoonis Habane ahaa nin aad u afgaaban, deeqsi ah oo gacan furan, dad aqoon ah, dabeecad waaagsan, dulqaad wanaagsan,askari aad u ilaaliya habdhaqanka askarinimada(millatary discipiline).

Kol haddii laga waramayo baadisooc tilmaameed waxaa mudan in la raadiyo weedhaha ka sugnaadey raggii jid,jidiin iyo jihaadba la galay.Kuwaasi oo ay in badan oo nolosha macaankeedii iyo qadhaadhkeediiba wadaageen.Sidaa darteed aan u baydhno dhinacaa iyo Mujaahid Cabdiraxmaan Aw Cali Faarax oo isaga laftigiisu sugay in marxuumku ka mid ahaa shakhsiyaadka faro ku tiriska ah ee mudan in lagaga daydo hab-dhaqankooda diimeed iyo dadnimoba.

Waxaa kaloo dadkii ay in ku dhaw afartan sanno aqoon isku lahaayeen Mujaahid Xasan Yoonis ka mid ahaa Mujaahid Maxamed Kaahin Axmed sheegayna inay marxuumka soo wada noolaayeen tan iyo sannadkii 1968-kii, isla markaana ay arday kawada ahaayeen dugsigii Farsamda Gacanta ee Burco iyo Jaamacaddii Milateriga.Waxaanu marxuumka ku sifeeyey inuu yaraantiisii ahaa nin af gaaban, asluub leh, bulshaawi ah aqoontana ku wanaagasan.

Mujaahid Ibraahim Cabdillaahi Xuseen (Dhagoweyne) ayaa ku tilmaamay nin karti iyo go’aan adag, oo ka mid ahaa hormoodka sababta u ahaa inay dhalato xurnimada aynu maanta ku naaloonayno. waxaanu xusay in waxyaabaha uu Mujaahid Xasan Yoonis ku xasuusto ay ka mid tahay diidmo qayaxan oo uu kala hor imid heshiiskii ay Siyaad Barre iyo Migiste kala saxeexdeen ee lagu doonayey in ciidammada SNM qoryaha lagaga dhigo.

Mujaahid Cabdi Yuusuf Ducaale(Boobe) oo ka waramaya Mujaahid Xasan Yoonis ayaa nala wadaagey qoraal ay ku xardhaneyd: “Xasan Yoonis Habbane, isaga oo ahaa sarkaal millateri, xirfad iyo aqoon wixii uu lahaa wuu ugu adeegay dal iyo dadba. Ka sokow xilalkii hoggaaminta ciidan ee uu soo qabtay intii lagu jiray halgankii hubeysnaa, waxa u dheereyd isaga oo saddex jeer noqday Taliyaha Ciidanka Qaranka ee Jamhuuriyadda Somaliland. Garasho iyo aqooni meel ay dhigeenba, waxaanu muran ka taagnayn in aanu dal iyo dad midna waxba ka hagran”.

Mujaahid Cabdi Yuusuf Ducaale(Boobe) oo sii wada tilmaan ka bixinta Mujaahid xasan Yoonis ayaa qalinkii hogaanka u sii daayey si farshaxanaysana ugu ladhey erayadan xeesha dheer : “Wuxu lahaa shakhsiyad keni-adayg iyo go’aan-qaadasho isku darsatay. Inta badan keli ayuu socon jiray, mar marna waxaad arki jirtay iyada oo uu Mujaahid la socdo ama carruurtiisa kuwa ugu yar yar mid wada. Kuma badnayn fagaarayaasha lagu

murmo. Waa ay adkayd in aad aragto Xasan oo fagaare ka hadlaya ama qalabka war-baahinta ku jira marka laga reebo warar ku taxan xilalkii hoggaamineed ee uu hayay. Halhays wuxu u lahaa marka uu hadlayo “Capo” oo af-talyaaniga ku noqonaysa Odey”.

Xilli ku beegnayd gu’gii 1992 ayaa shir lagu qabtey xafiiska wasaarada arimaha gudaha ee wadanka Somaliland.Waxaa shirkaa lagaga wada hadlayey arimaha nabadgalyada ee magaalada Hargeysa.Xilligan mujaahid Xasan Yoonis ayaa ahaa taliyaha ciidanka qaranka waxaanu ku sugnaa madasha shirka.Dadkii ka qayb galay waxaa kaloo ka mid ahaa mujaahid Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale(Boobe) waxaanu sugayaa in markii uu Xaaji Cabdi-Waraabe u holladey hadalka uu yihdi: “Xasan Yoonis waa Janan dhab ah. Ma hadal badna, waa nin af-gaaban oo aan inta badan fagaarayaasha lagu arag. Ma aha nooca warqadda loo qoro ee shaqada laga eryo. Waa nooca marka ay damcaan istiqaaladda ku joog-joogsada. Xasan waa Janannadii ka arki jiray”.

Waxaa kaloo si hufan u dhigay tilmaamaha lagu baadisooco Mujaahid Xasan Yoonis Habane qaar ka mid ah dadkii ay in badan wadaageen xeryaha ciidamada uuna ka mid ahaa Mujaahid Maxamed Xasan Cabdilaahi(Jidhif) oo nala wadaagey odhaahdan : “Xasan Yoonis nin aad ugu adag buu ahaa qaynuunka iyo dastuurka milatarinimo, noloshiisana aad buu isugu taxalujin jiray ,caadana umay aheyn inuu galo waxaanu aqoon u laheyn”.

Isagoo mujaahid Jidhif hadalka sii wata ayuu raaciyey inuu inoo sugo bar tilmaameedka waarta eey taariikhda u gashey mujaahidka yidhina: “Dhaqdhaqaaqa SNM wuxuu Xasan Yoonis ahaa raggii ugu horeeyey ee guulo la taaban karo ka soo gaadhey, dhinaca ciidanka qaranka Somaliland-na waxaabu Xasan Yoonis ahaa ninkii aasaasey ee salka u dhigay bilawgii, dhibaatooyinkii ka hor yimid waxay aheyd kooxihii daydaygii waanu ka guulaystay, markii u danbeysay ee uu taliyaha noqdayna waaba ninka gaadhsiiyey ciidamadii qaranka gobol kasta oo ka mid ah Somaliland xataa goboladii Sool iyo Sanaag.Waxaa la yaab leh inaanu marna u dhuun daloolin inuu hanti ka yeesho xilka loo dhiibay, lama hayo wuxuu ka dhistay iyo wuxuu meel dhigtay toona.Wuxu ahaa wadani tilmaan mudan leh”.

Guddoomiyaha Xisbiga UCID, Eng. Faysal Cali-waraabe ayaa sheegay inuu Alle haw naxariistee Muj. Xasan Yoonis Habbane ka mid ahaa raggii qayb libaax leh ka soo qaatay halgankii dalka lagu dib loogu xoreynayey, waxaanu ku tilmaamay marxuumka geesi uu magaciisa ka baqo cadawgu.

## Himili Dheeri:

Nolol aan gudneyn
Geeraa ka roon
Gaawe laga dhameyn
Badda guuxda een
Goof baa ka roon
Wuxuu gabaygu yidhi
Guuf iyo qadhaab
Gowsuhu dirteen
Loo garabsadee
Waan garanayaa

Godka aakhiriyo
Gabno aan waqeed
Giiraa ka roon
Galaan laga dareyn
Gundhig iyo tilmaan
Gini lacag ahiyo
Ninka goobayee
Muu gudan xilkii
Waxa goortan guda
Waa ragiyo geel

Iyo gool libaax

Agabare ,Axmed Aw Geedi "Dheeraad"

Horaa loo yidhi Indheer garato dhul dheer bay dhaan u rarataaye,waxaa aad layskugu raacey in Mujaahid Xasan Yoonis Habane uu ahaa indheergarad had iyo jeer ku xisaabtama isku ladhka tagtada, joogtada iyo timaatada. Waxaa saaxiibadiisii ugu dhadhawaa qireen inuu aad u himilo dheeraa guusha dhawina aaney isaga u tirsaneyn kol haddii lagaga danbeyn karo. Waxaan tilmaan u soo qaadan karnaa Mujaahid Muuse Axmed Ibraahin (Dhagaweyne) oo dib u jaleecay waayihii halganka iyo himilo dheeridii mujaahid Xasan Yoonis Habane yidhina: "Muj. Xasan Yoonis Waxaan ku xasuustaa kulankayagii ugu horreeyey oo ahaa 1984-kii, ayaa waxaan u gudbiyey fikrad ay jeclaayeen taageerayashii SNM ee dibaddu oo ahayd maxaa hebel iyo hebel looga dili waayey Hargeysa iyo Burco, wuxuna Mujaahid Xasan iigu jawaabay haddii aannu labaatan Mujaahid u dirno mas'uulka keliya dilkiisa waxa dhici kartaa in aannu labaatankaa mujaahid ee aanu u dirnay mishinka(mission) dilka shaqsiga keliya inaanu kala kulanno khasaare," .

Tani waxay muujinaysaa inaanu marna dilka hal qof oo cadow ahi u badali karin gumaadka soo gaadhi kara tiro ka badan oo halgamayaashii SNM ahaa.

## Xilalkii uu soo qabtay:

Waxaa aad layskugu waafaqsan yahay inuu Mujaahid Xasan Yoonis si dhakhso ah ula kulmay dalacaad degdeg ah kuna mutay dadaakisa iyo kartidii uu ka muujiyey meelihii loo dhiibay . Xilkii ugu horeeyey ee uu qabtay wuxuu ahaa inuu Mu noqday taliye ku xigeenka ciidamada Garoowe, muddo yar ka dibna uu noqday taliyaha guuto ee qaybtii 21. Markii uu ku biiray ururkii dhaqdhaqaaqa wadaniga Soomaliyeed (SNM) wuxuu Muj noqday gu'gii Horraantii 1984, waxa uu noqday taliyaha Ciidanka SNM ee Laanqeyrta.Mujaahid Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale(Boobe) oo xilkaa inoo sii faahfaahinayaana wuxuu yidhi: "Xilkii ugu horreeyay ee uu SNM ka qabtay wuxu ahaa isaga oo Taliye looga dhigay ciidan 700 ahaa oo lagu ururiyay Laan-qayrta. Wuxu xilkaa kala wareegay Shahiid Mahdi Cali Faarax oo ahaa Taliyihii 1aad ee ciidankaa madax u noqda. Ciidankaasi wuxu ahaa miillateri soocan ah oo laga soo ururiyay jiidaha hore ee

dagaalka. Go’aan SNM qaadatay ayuu ahaa in meel la isugu geeyo dhammaan wixii ciidammadii Qalabka siday ee Xooggii dalka Soomaaliyeed ka mid ahaa”.

Xilkii labaad ee ka qabtay ururkii SNM wuxuu ahaa inuu noqday Taliyaha Aagga Galbeed ee ciidankii SNM 1984kii ilaa 1985kii. Muddo laba sanno ah ayuu ka maqnaa madasha hogaanka, inkastoo aad loo dareemayey hawlgaladiisa iyo waxqabadkiisa oo had iyo jeer lagu yaqaaney inuu markuu xilka hayo iyo markaanu haynba uu si isku mid ah u fuliyo hawlaha loo igmadey damac hogaanimeedna aad bay uga madhnayd, waana tilmaamaha uu aad uga duwan yahay saraakiil badan oo SNM-ta ahaa .Waxaa la tilmaamaa inuu mar walba xilku soo doonan jiray eenu aheyn nin daba ah xil raadis.Taasaa keentay inuu noqdo saaxiibka dhamaan dadka yaqaaney mujaahid Xasan Yoonis Habane.Hase yeeshee dabayaaqadii 1987 ayaa loo magacaabey inuu noqdo Abaanduulaha Ciidamadii SNM , bal mar kale aan dib u jaleecno Mujaahid Boobe oo inoo balbalaadhiyana xilkan, waxaanu yidhi : “Shirweynihii 5aad ee SNM oo ku qabsoomay magaalada Adari ee dalkaa Itoobiya Feeberweri 1987kii, Xasan Yoonis Habbane waxa loo magacaabay Abbaanduulihii Ciidammada Xoreynta ee SNM, iyada oo uu markaa ciidammada Taliye u ahaa Axmed Mire. Xilkaa Abbaanduulaha wuxu hayay ilaa badhtamihii bishii Meey 1988kii, iyada oo Taliskii Ciidanka la beddelay oo Guddi Dagaal-gelineed oo shan xubnood ah laga dhigay. Maalmahaas ayaa Jaamac Cali Cilmi oo ahaa Taliyihii Dugsiga Tababarka ee Awaare laga dhigayaa Xoghayaha Ciidammada Xoreynta ee SNM, kaas oo loo dhisay guddi dagaal-gelineed oo la hawl-gasha. Xasan Yoonis Habbane wuxu xubin ka noqday Guddidaa Dagaal-gelinta iyada oo loo tix-geliyay waayo-aragnimadii, aqoontii iyo xogtii ciidan ee uu hayay maa daama Taliskii la beddelay. Isaga waxa Guddida loogu reebay in uu marjac iyo raad-raacba u noqdo maa daama uu xilka Abbaanduulennimo soo hayay muddadii ugu danbaysay. Guddidaasi waxay ka koobnayd:Jaamac Cali Cilmi,Xasan Yoonis Habbane,Cabdi-samad Xaaji Cabdillaahi,Maxamed Kaahin Axmed,Cabdirasaaq Axmed Cali”.

Bishii May 18, 1991 ayaa dalka Soomaaliland dib dhidibada loogu taagey.Waxaa jiray dhibaato badan oo daydaygii wuu batey, ciidamadii dalku yeelan lahaa beelaa yeeshay,waxaa markaa loo gartey Mujaahid Xasan Yoonis oo loo caleemo saarey darajada General inuu noqdo Taliyaha ciidamada qaranka wadanka Somaliland loona igmadey inuu u sameeyo saldhig iyo maamul guud ciidamadaa beeloobay,waxaanu xilkaa hayey ilaa 1993.
Hase yeeshee muddo saddex gu’ ku dhawaad ah ayaa mar labaad dib looga codsadey Mujaahid Xasan Yoonis inuu qabto Xilkaa taliyaha ciidamada qaranka oo uu hayey ilaa iyo 1998. Gu’gii 2001 ayaa dalku u baahdey in ciidamada qaranka lagu baahiyo dhamaan gobolada dalkoo dhan waxaana mar saddexaad laga codsadey Mujaahid Xasan Yoonis inuu noqdo taliyaha ciidamada qaranka Somaliland uuna hayey xilkaa ilaa 2003. Mujaahid Xasan Yoonis oo ka hadlayey maalintii xilkan danbe uu la wareegayey ayaa laga hayaa inuu yidhi: “Marxaladda waqtigan ah inaan amba xil qabto way igu adkayd run ahaantii.”“Hase yeeshee, wixii qaran ee lagaala maarmi waayo dee wuu ku qabsan yahay mawaadin kastaa wixii uu ku biirin karo”.

# Geeridii Mujaahidka:

Mujaahid Xasan muddo ku dhaw todobaad ayuu xanuun ugu jiray dhakhtarka Edna Hospital.Waxaanu bisha Nofember 26,2006 ku dhintay isla dhakhtarkaa.Waxaanu si xushmad iyo milgo leh loogu aasay magaalada Hargeysa.Maalintaa siday wax u dahceen bal aan qalinka u fidiyo Mujaahid Boobe oo inooga warama,waxaanu dhigaalkiisu ahaa sedan: "Waxaan ku waa-bariistay sawirlaha Cige oo aan hawlo ku lahaa, halkaas ayaa la iiga sheegay in laga qaadi doono meydka guriga hooyadii oo ku yaal Istaanka Jabuuti maa daama gurigiisu ku yaallay meel buur ah oo aanay baabuurtu geli karayn. Sidii ayaanu ugu hawl-gallay sidii meydka si sharaf iyo maamuusba leh loogu aasi lahaa. Cabbaar aan badnayn ayaa la sugayay walaalkii Axmed oo Jabuuti ka soo duulay, Looma kala hadhin. Si aan la malayn karin oo ay adag tahay sida lagu qiyaasaa ayaa loo gelbiyay. Illeyn geeriduna gelbiskeeda ayay leedahay".

Waxaa maalintaa hadalo ka jeediyey dad faro badan oo sheegay taariikhdii halgameed ee Mujaahid Xasan.Hase yeeshee waxaa mareegta Farshaxan u suurtogashey inay helaan hadaladii halkaa laga sheegay iyo odhaahyihii taariikhyasnaa,waxaanu soo qaadaneynaa qaar ka mid:

Xoghayihii Guud ee Xisbiga UDUB, marxuum Maxamed Ismaaciil Bullaale ayaa xusay inuu marxuumku ahaa halgamaa daacad ah, isla markaana geeriyooday xilli uu ku guulaystay hadafkii uu lahaa ee dib-u-xoreynta dadkiisa iyo dalkiisaba.

Mujaahid Muuse Biixi Cabdi ayaa marxuumka ku tilmaamay halyey u horay noloshiisa iyo ummaddiisaba, kaas oo u geeriyooday hagardaamooyinkii iyo dhaawacyadii ka soo gaadhay halgankii, waxaanu kula dardaamay bulshada reer Somaliland in si gaar ah loo daryeelo inta ka nool mujaahidiintii dartood usoo martay halganka dheer, isla markaana dhaliyey xornimada maanta la hadhsanayo.

Madaxweyne ku xigeenka Somaliland Md. Axmed Yuusuf Yaasiin oo xabaasha dusheeda kula hadlay Warbaahinta ayaa yidhi, "Marxuum Xasan Yoonis waxa uu ka mid ahaa Korneeladii u xaytay inay Rajiimkii Afweyne ka tuuraan Xukunka markii dalkan la cadaaadiyay, halgan dheer buu soo galay ,ciidanadeenana waxaa uu ka ahaa janan oo nin adag buu ahaa. Waxa u daliil ah in la jecelyahay dadkaas ka soo xaadiray aaskiisa ee soo raacay maanta, waxaana sidoo kale cad inuu yahay Ehlu jana. Waxaan leeyahay bulshada Somaliland oo dhan Eebe samir iyo iimaan ha inaga siiyo."

Waxaa aaskii Mujaahid Xasan Yoonis Habane ku kulmay dhamaan hormoodka Somaliland, Xisbiyada dalka, dadweynaha ,iwm. Waxaa halkaa ka muuqatey murugo badan oo aad loo tabayey halyeyga geerida haleeshay,Waxaa ilyarta is qabsadey gawaadhidii daad guraynaysay dadkaa, hase yeeshee wanaagaa faraha badan ee la muujiyey oo guul ah waxaa mudnaan laheyd in meesheeda iyo marinkeeda ku haboon lala beegsado .Mujaahid Cabdi Yuusuf Habane oo arintan tilmaan ka bixnayana wuxuu qoraalkiisa ku sugay sedan: "Bal ka warrama haddii aynaan ifka isku aqoonsan ee qofka maalinta la aasayo ee Ilaahii abuurtay la xisaabtamayo aynu ka dul barooranno. Ka

warrama nin kow u dhintay haddii aynu kumanyaal ku burburinno. Bal waxaynu iskaga masuugayno iyo ilmada aynu isu qubayno eega. Miyaynaan waxyaabaha caynkaas ah ee dal iyo dadba nusqaanta ku ah ka waantoobayn. Ma cuqubadaas ayaynu carruurteennna uga tagnaa? Miyaynaan u baahnayn in aynu fikirkeenna, aragtideenna nololeed iyo dhadhankeennaba dib ugu noqonno".

# Duco Saar:

Ilaahay (xumaan ka hufanee) adoomaha xaqa uu u saarey dadka geeriyooday waxaa ka mid ah in lagu tukado ka dibna loo duceeyo .Waxyaalaha waxtar joogtaa keensanayana waxaa ka mid ah ilmo aad dhashey oo kuu duceeya.Waxaa hadh iyo habeen duco aan kala hadheyn la garab taagan mujaahidka Xasan Yoonis Habane intuu dhalay iyo dhamaan dadweynaha degan dalka Soomaaliand.

Waxaa kaloo duco hawada u marinaya Mujaahid C/laahi Askar oo yidhi : "Mujaahid Xasan Yoonis halgankii ururkii SNM u soo galay, xoreyntii dalka qayb libaax buu ku lahaa, xilal kala duwana wuu ka soo qaybtay, illaahayna naxariistii janno ha ka waraabiyo, ehelkii uu ka baxayna samir iyo iimaan ha ka siiyo". Waxaa ducadaa aan ka hadhin oo ka qaybgalay Xildhibaan Axmed Maxamed Diiriye (Nacnac) oo yidhi "Runtii Muj. Xasan Yoonis waxa uu ahaa nin wadaniya oo halgamaaya oo dalkan iyo dadkanba abaal ku leh, illaahayna naxariistii janno ha ka waraabiyo".

Bahda mareegta Farshaxana waxay Ilaahay uga baryeysaa inuu godka aakhiro u iftiimiyo,ugana dhigo goglo raaxo leh Mujaahid Xasan Yoonis iyo dhamaan mujaahidiintii kaleba,aakhirana Ilaahay ugu deeqo Janatu Fardawsa.

## Ayaanadaro ummada ku habsatey:

Waxaa aad dadkeena loogu tiriyaa inay yihiin qabri amaan.Marka uu qofku dhinto ayeynu xabaasha ka dul sheegnaa amaanaha iyo geesinimada shakhsigaa la aasayo.Hase yeeshee waxaa la yaableh in dadka erayadaa quruxda badan adeegsanaya ,tilmaan fiicanna ka bixinaya maydkaa aaney marna ka ag muuqdeen golihii u halyeygaasi ku xanuunsanayey.Waxaanay og yihiin inaan golahaas looga baahneyn hadal ee waxtar looga baahan yahay.Mujaahidkii Axmed Mire oo ay aad u saaxiib ahaayeen Xasan Yoonis ayaa la holadey qoraal sidan u dhignaa: "Xornimaddii dalka ka dib wuxuu nasiib u yeeshay Xasan Yoonis Habane inuu dhiso oo hoggaamiyo ciidamada qaranka Somaliland. Taariikhdu iyadaa is qorta, waxaanse u sheegayaa dadka Somaaliland, waxa aan idiinku soo gabo gabynayaa waar dadka taariikhda leh ilaashada oo daryeela si taariikhdiinu u jirto mid masuul ah iyo dadweynaba, idinka oo isku duuban oo walaalo ah geeridu yay noqon tan keliya ee idin walaalaysa".

Waxaa kaloo aad ay u dhibtay Mujaahid Muuse Biixi markii uu Maxamed Xasan Yoonis sannad guuro xusid u sameeyey aabihiii Mujaahid Xasan Yoonis bishii November 29,2007.Mujaahid Muuse Biixi oo halkaa dadkii ka hadlay ka mid ahaa wuxuu xusay hawlgabka dawlada iyo dadweynahaba ka haysata u hiilinta dadkii naftooda iyo hantidoodaba u huray jiritaanka wadanka Soomaaliland waxaanu ku bilaabay sidan:

“Waxaynu maanta xusaynaa geeridii Mujaahid Xasan Yoonis, sanad-guuradii 1-aad ee ka soo wareegtay iyo mujaahidiintii kale ee halganka ururka SNM ku geeriyootay. Waxa Illaahay mahadiiya inuu maanta wiil uu dhalay oo mudakar ahi uu xabaashii ka dul dhisay taalo, waxay ahayd in Mujaahid Xasan Yoonis qaranku uu taalo u dhiso, balse arrintaa cid gaara oo lagu canaanayaa ma jirto, waxayse ka mid tahay uun baylahaha balaadhan ee dalka ka jira, anaguna xuskiisa waxaanu ku soo ajiibnay in aanu u soo duceyno”.

Waxaa guuldarada sidan oo kale ah loo tiriyaa bulshada uu ka dhashey halyeygu, sababtoo ah hogaanka sare ee qaranku had iyo jeer aad buu ugu dabacsan yahay dhinaca uu u janjeedho dareenka bulshadu. Hase yeeshee dadka rajo ka bixiyey in ay mar uun dhici doonto in la qiimeeyo halyeyadaa waxaa ka mid ahaa xildhibaanka ka soo jeeda gobolka Gabiley ee xildhibaan Ibraahin Axmed Haybe oo yidhi: “Geesigii Mujaahid Xasan Yoonis waxaanu qiraynaa inuu ahaa nin dalka u soo halgamay, isaga iyo Mujaahidiintii kale ee ku shahiiday halgankii xoreynta dalka, waxaanay u dhinteen jiritaanka iyo madax banaanida Somaliland, hase ahaatee insha Allaahu waxa taariikhdooda iyo abaalkoodaba gudi doona marka ay hogaanka qaranka qabtaan maamul dadka iyo dalka lexjeclo ka lihi”.

## Gunaanad:

Ummad walba jiritaankeeda waxaa qayb wayn ka qaata qiimaynta ay siiyaan hormoodkooga.Waxaa runtii mudan in la sugo taariikhda halgameed ee wadankeena Somlailand oo qof waliba intuu karo awoodiisana ah la shir yimaado,ogoowna gacmo wadajir bay wax ku gooyaan.Waxaan wanaagsaneyn qiirada dhawr daqiiqo ku dhamaadka ah ee la caadeystay iyo qalinka qaadasho loo diiday.

Mujaahid Xasan Yoonis Habane iyo intii kale ee mujaahidiinta aheydba waxaan Ilaahay uga baryeynaa guul iyo jannatu Fardawsa.Mujaahid Cabdilaahi Askar oo ka halayaana wuxuu yidhi:“Xasan qiimo iyo qaddarin buu lahaa xilal badan ayuu SNM iyo Somalilandba ka soo qabtay, hawshiisa nin ku eeg buu ahaa, waajibaadkiisana guta, midhihiisiina waxa intifaacsanaya shacbiga reer Somaliland ."

Wasiirkii Gaanshaandhiga ee mudane Aadan Mire Waqaf ayaa sheegay inuu Xasan Yoonis ahaa Geesi ka baxay bahda Gaashaandhiga Somaliland, waxaana hadaladiisii ka mida ahaa “Ehelkii, mujaahidiintii, ummada Somaliland iyo gaar ahaan bahda gaanshaadhiga geesigaa naga baxay waxaanu uga baryaynaa in illahay Janadii ka waraabiyo, Geesigaas oo ahaa mid tilamaamihisa iyo waxa uu somaliland u soo qabtayba aan kelimaad lagu soo koobi karayn, taariikhda Somaliland waxa uu ka gelayaa Baal dahaba oo ku mutaystay Mujaahidnimadiisii iyo Taliyanimadiisii uu Ciimada Qaranka mudco Saddex jeera soo maray”.

Xasan Yoonis Habbane magaalada Jigjiga ayuu ku aqal-galay xilli ku beegnaa 1986kii, waxaanu guursaday Xamda Ciise Kibbaar. Waxay ooryo-walaal noqdeen Korneyl Mahdi Cali Faarax oo is-na ku shaahiiday halgankii hubeysnaa ee SNM oo isaguna qabay Maryan Ciise Kibbaar. Xasan Yoonis Habbane wuxu ifka kaga tegay saddex wiil iyo lix hablood oo kala ah: Maxamed, Faa’isa, Firdowsa, Hodan, Deeqa, Mowliid, Leyla, Xaliimo iyo Ayaanle.

Sheekh Aadan X. Xiiray (Aadan Siiro) oo ka mid ah culimada waaweyn ee reer Hargeysa, ayaa lagama maarmaan ku tilmaamay in la qoro oo la ururiyo taariikhda halgankii SNM ee dalka lagu xoreeyey, isaga oo sheegay in midnimada Somaliland ku jirto xusuusta iyo ururinta halgankii ummadda.

Faaraxow galgaladkaan dhigiyo gama' la'aantayda
Gogoshaan ku jiifsaday hurdada goodkii igu yaacay
Gasiinkii la ii dhigay waxaan gawska uga daayey
Dar guryii ka yimi baa war baas iila soo galaye
Geeridii Xirsay sheegayeen gacal ha waayeene
Goblamooyin waxay ii wadeen guuldarriyo hooge
Gabbal baa u dumey reerihii geliga Booc yiille
Abidkii rag waa go'i jiree tanise waa gaw'e
Lix hal oo u wada gaar ahaa gocanayaa mooyi
Mid weeye haddii lays galoo geel la kala qaado
Gurmad noqonayaa iyo annagu guuto bixinnaaba
Giiryaalihii fule markuu gelelef rooraayo
Rogaalkuu giraangirin ogaa gocanayaa mooyi
Geb hadday maritidu soo tidhaa goor u nala joogo
Godka lagu janneeyow hadduu goosan la carraabo
Garab saar rag weeyee hadduu gogosha soo qaado
Gasiinkii la soo dhigay haddaad gal iyo daad mooddo
Bakhayl baa gammiima'e intuu gaadhka ka qoslaayo
Godolkuu ku haasaawin jirey gocanayaa mooyi
Gar adkaatay, xaajada gurracan, guurti kala maagtay
Haddii geedka laysugu yimaad golaha waayeelka
Waxay gola fardooddaba haddii la isku soo gaadho
Nin waliba hadduu gees damcoo giijo madixiisa
Wax la wada gorfeeyaba haddii la isu geyn waayo
Gaagaabsayaa iyo isagu gees u hadal yaaba
Guddoonkii la wada raaci jirey gocanayaa mooyi
Gugoo da'ay aroosyada haddii gowda laga saaro
Shir girmidha haddii loo kiciyo gob iyo reer aada
Gammaan naaxay heensaha haddii guudka laga saaro
waa gelin is daawada halkii garangar loo joogey
Gole igu bannaanaa wallee garab la'aaneede
Gunnaduu ka soo toocin jirey gocanayaa mooyi
Gardarrada sokeeyaha rag baa gees biciid u lehe
Gudcurkiyo caddadu waa walaal kalase guul roone
Gaadiid Ia dhaanshuu ahaa gibil ma diidaane
Guraduu na wada saari jirey gocanayaa mooyi
Alla wuxuu golxaalow ahaa gedefka reeraaye
Magaciisu waa gudubsanaa gaaliyo Islaame
Galbeed iyo Baraa laga yiqiin gololkii dheeraaye
Gaashaan biruu noo ahaa gocanayaa mooyi

Adduunyadatan laga guurayo ee gebegebaa taagan
Ee laga galbaday meesha iyo geeridii Maxamed (NNKH)
Anuun baa gubtanyoonaya oo geesigii tebaye
Gartaa u noqday Eebbow ma jiro garangar waartaaye
Allahayow wax badan baan gefaye Adigu hay goynin
Oo geesta Nebigii i mari maanta lays gurayo.

Cali Jaamac Haabiil,

Tixraac:

-Mareegaha Halganews(Tuesday, 28 November 2006), SDWO (Hargeisa 28/11/06), Haatuf(Feb,2003), safka hore , Farshaxan , Hadhwanaagnews, Gabileynews.

-Wareysi Faysal Cumar Mushteeg
Wareysi Qaade: Cabdisalaan (Abu Hurayra)
-Wareysi Mujaahid Maxamed Xasan Cabdilaahi (Jidhif)
Wareysi Qaade: Cabdisalaan (Abu Hurayra)
-Wareysi Cabdiraxmaan (Baqdaadi )
Wareysi Qaade: Fu,aad Sh.Abuubaker

-Wareysi Aadan Hanfi
Wareysi Qaade: Fu,aad Sh.Abuubaker

-Wareysi Caydiid
Wareysi Qaade: Fu,aad Sh.Abuubaker

- Wareysi Cabdi cabdilaahi
Wareysi Qaade: Fu,aad Sh.Abuubaker
- Mareegta countrystudies.us

Mahadnaq:
Waxaan dhamaan u mahadnaqeynayaa dadkii gacan ka geytay qoraalkani inuu soo baxo oo iyaga la'aantood aanu qoraalkani soo baxeen.

Qalinkii :
Fu,aad Sh. Abuubaker
Bahda Mareegta Farshaxan
http://www.farshaxan.com